

# Xaashida Xaqiiqda - Bixinta ama wax siinta Gaarka ah

## Waa maxay Bixinta ama wax siinta Gaarka ah?

Bixinta ama wax siinta Gaarka ah ayaa loo heli karaa ardayda VCE ama VCAL ardayda ay saameeyeen jirada, naafanimada ama qodob kale. Haddii loo ogolaado, bixinta ama wax siinta gaarka ah waxay siisaa ardayda fursad ay kaga qaybgalaan oo ay ku muujiyaan waxay bardeen.

Bixinta ama wax siinta gaarka ah ayaa loo heli karaa:

- barashada fasalka
- Qiimaynta ku saleysan iskooladka
- Qiimaynta dibedda VCE-da.

Ardayda waxaa suuragal ah inay heli karaan Bixinta ama wax siinta Gaarka ah haddii ay saameeyaan:

- jirro daran ama raagtay
- arrimaha shaqsiyeed ama qoyska
- Itaal darrida ama naafonimada, oo ay ka mid tahay cilad barashada.

Ardayda waxbarashadooda ama qiimeyntooda ay si ba'an u saameysay dhibaatooyin taasoo keentay in mudo dheer eey ka maqnaadan iskooladka ayaa waliba heli kara fursad qaas ah.

## Maxaa dhacaya haddii lagu siiyo Bixinta ama wax siinta Gaarka ah?

Bixinta ama wax siinta Gaarka ah waxay noqon kartaa dhowr qaab oo ay ku jiraan:

- dhammaystirka howlaha fasalka iyo howlaha qiimeynta waqti u gaar ah
- lagu siiyo wakhti dheeri ah oo lagu dhammaystiro shaqada ama hawlaha qiimaynta
- dhammaystirka cashiro gooni ah ama nooc kale oo shaqo ah
- isticmaalka teknoolajiyada, kaaliyaha ama qabanqaabooyinka kale ee gaarka ah ee lagu caawinayo barashada fasalka ama howlaha qiimeynta
- In lagu qiimeeyo natiijooyinka ama buundooyinka cashiro kale and shaqooyin kale oo uu ardaygu dhammeeyay.

## Sideed u codsan kartaa bixinta ama wax siinta Gaarka ah?

Hadaad is leedahay waad u qalanta Bixinta ama Wax Siinta Gaarka ah markaa waxaad ubaahantahay inaad la xiriirto maamulaha iskuulkaaga ama xiriiriyaha VCE-da. Dugsigaaga ayaa leh mas'uuliyadda go'aaminta haddii aad xaq u leedahay Bixinta ama Wax Siinta Gaarka ah ee barashada fasalka iyo / ama qiimeynta ku saleysan dugsiga.

Maamulka Manhajka Fiktooriya iyo Maamulka Qiimeynta (VCAA) ayaa leh mas'uuliyadda go'aaminta haddii aad xaq u leedahay Diyaarinta Imtixaannada Gaarka ah ee qiimeynta dibedda ee VCE-da oo ay ku jirto Imtixaanka Guud ee Guusha (GAT).

Iskuulada ayeey masuuliyad ka saran tahay inay soo gudbiyaan dalabyada diyaarinta Imtixaanada Gaarka ah iyagoo ku matalaya ardaydooda.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Bixinta Gaarka ah waxaa laga heli karaa websaydhka VCAA <https://www.vcaa.vic.edu.au/>

Sidoo kale waxaad kala xiriiri kartaa VCAA:

- Telefoon: 9032 1629 (adeegga turjumaanka taleefanka qaranka waxaa laga heli karaa 131 450).
- Iimayl ahaan: [vcaa@education.vic.gov.au](mailto:vcaa@education.vic.gov.au)

Maamulka Manhajka Fiktooriya iyo Maamulka Qiimeynta (VCAA) waa hay'adda dowladda ee:

- Waxay dejisaa koorsooyinka lagu dhigto dugsiyada Fiktooriya
- qorsheeya sidoo kale na maamusha qiimeynta Shahaadada Victoria ee Waxbarashada (VCE) iyo Shahaadada Fiktooriya ee loo adeegsankaro (VCAL).